Waa maxay STORY?

(Baaritaanka Dheecaanka Difaaca ee Wakiilka Dhalinta)

Macluumaadkaan waxaa laga helayaa www.whatsthestory.org.uk asagoo kuqoran luuqadaha sosocda:

ਪੰਜਾਬੀ (Punjabi)

زبان اردو(Urdu)

Française (French)

Portugues (Portuguese)

Español (Spanish)

नेपाल (Nepalese)

عربی (Carabi)

বাঙালি (Bengali)

Somali

فارسی (Farsi)

Waalidka/masuulka sharciga ah ee qaaliga ahoow,

Waa maxay STORY? Kooxda waxay doonaysaa inay ku casuuno ilmahaaga ka qaybgalka daraasad qaran oo lagu eegaayo heerarka difaaca jirka ee kadhanka ah xanuunada talaalka looga hortagi karo xanuunada caabuqa ee kajira wadanka Ingiriiska. Daraasadan iska kaashaday Caafimaadka Dad waynaha Ingiriiska, NHS, Jaamaca Oxford Sheffield Cusbitaalka Carruurta NHS trust, Cusbitaalada Waxbarida Bradford Mu'asasada NHS, Cusbitaalada waxbarida Leeds ee NHS, Cusbitaalada Jaamacada Bristol Mu'asasada NHS, Jaamacada Southampton Mu'asasada NHS, Cusbitaalka Carruurta Boqortooyada ee Manchester - Jaamacada Manchester NHS iyo Cusbitaalka Jaamacada St George NHS iyo Adeega Caafimaadka Jaamacada Nottingham, iyo Isbitaalka Jaamacada Mu'asasaadka Plymouth NHS. Kahor intaadan go'aansan inaad kaqaybgalayso iyo inkale, muhiim ayay kuutahay inaad fahanto waxa laga hadlaayo. Fadlan si taxadarleh u akhri macluumaadka kuqoran buugaan. Hadaad qabto wa su'aalo ah fadlan waydii kooxda daraasada goobtaada maxaliga ah addoo wacaya taleefanka ama iimeel noogu soo diraaya sida ka muuqata webseetka.

Maxaa cunugayga loogu casuumay si uu uga qaybgalo?

Waxaan kucasuumaynaa caruurta iyo dhalinta qaangaarka ah oo da'doodu udhaxayso dhalashada iyo 24 sano jir si ay uga qaybgalaan daraasadaan. Waxaa adigga laguusoo aaday waa in cunugaagu uu kujiro cabirka da'da daraasada lagu samaynaayo waxaadna kunoshahay aaga qabashada daraasa. Hadaad heshay casuumaadaan oo laguugusoo diray boostada waxaa kuusoo diray casuumaadaan midkood National Health Applications and Infrastructure

Services (NHAIS, Waaxda Qaran ee Codsiyada Caafimaadka iyo Adeegyada Kaabayaasha dhaqaalaha) taasoo gacanta kuhaysta kaybta dhexe ee macluumaadka bukaanada NHS amChild Health Information Service (Adeega Macluumaadka Caafimaadka Caruurta)', oo ah kayd haye udhigma NHS ama waxaa kuusoo diray Dhakhtarkaaga Guud ee Qaliinka. Fadlan ogsoonoow in Waa maxay STORY? aan la siin magaca cunugaaga iyo ciwaankiisa.

Maxay daraasadu kahadlaysaa?

Ujeedada daraasadaan waa in ay naga caawiso fahanka STORY xanuunada caabuqa faafiya ee ka jira wadanka Ingiriiska. Hal kamid ah qaababka jirkeenu uu ku abuuro difaaca ka dhanka ah cudurada caabuqa waa inuu soo saaro difaacyada jirka, midkood kadib marka caabuqu ku dhaco ama ka dib marka talaalka la baxsho. Waxana cabiri karnaa difaacyada jirka si aan u aragno sida jirkeenu nooga difaacayao cuduradaas caabuqa ka dhasha.

Si aan daraasadaan usamayno waxaana kala shaqaynaynaa Public Health England abuurista si ay dhiig uga aruuriso tiro lasoo xushay oo ah dhalinta da'doodu udhaxayso 0-24 kuna sugan daafaha Ingiriiska. Waxaa jiri doona ilaa 3500 oo ka qaybagalaysa.

Marka koobaad waxaan baaraynaa cudurka COVID-19, kooxda C ee cudurka meningococcus (MenC) iyo qamoow-qashiirka. Markaan fiirino difaacyada ka dhanka ah cudurada caabuqa sida COVID-19 waxaan sheegi karnaa heerka bulshada qaaday xanuunkaan. Xogtaan ayaa ka caawinaysa Public Health England (Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee Ingiriiska) iyo Scientific Advisory Group for Emergencies (SAGE, Kooxda Talo Bixinta Sayniska ee Xaaladaha Degdega ah) si ay u garaan go'aano ku aadan qaabka lo maamulaayo gurmadka aafada COVID-19 hadda iyo mustaqbalkaba.

Hadda si muuqata **uma** raadinayno inaan qorno shaqsiyaad qaba cudurka ama looga shakisan yahay inay qabaan COVID-19, laakiin taas badalkeed waxaan doonaynaa inaan fikir ka qaadano bulshada guud. Shaybaadhku ma bixinayo natiijo halkaas ah oo *waa muhiim inaan fahano inaanaan siin doonin shaqsiyaadka ka qaybgalaaya daraada (ama qoysaskood) natiijooyinka baaritaankooda*. Talaabadan muhiimka ah ee la isku dayayo oo markaa sugaysa sixitaanka daraasadan ilaa inta macquulka ah haddaan si fudud u dhigno, ma doonayso inaan qorano dad aad u badan oo dareemaya in ayaga, ama cunugooda, uu qabo COVID-19 'doonaayana in la baaro.' Arintaan ayaa nasiinayna xog khaldan oo ku aadan faafida COVID-19 iyo difaaca ka dhanka ah fayriskaan dhammaan bulshada.

Baarista difaacyada ka hortaga xanuunada MenC iyo diphtheria waxay naga caawinayaan inaan fahano sida ugu fiican ee barnamaijka hadda socda ee talaalku ushaqaynaayo iyo si gaar ah in inaan ogaano haday jiraan da'o gaar ah ama bulshooyin oo qaba difaacyada heerarka kala duwan leh.

Waa maxay novel coronavirus (COVID-19)?

Novel coronavirus (COVID-19) waa fayris cusub oo dadka ku dhaca. Coronavirus yadu waa tiro badan oo fayrisyo ah oo leh astaamo ka dhasha oo la mid ah kuwa qaboowga iyo xanuunada kale oo keenaaya caabuqyo aad u daran. Coronavirus yada waxa abadanaa lagu

faafiyaa dhibco waawayn oo ka yimaada qofka qufacaaya ama hindhisaaya. Maaha in qof kasta fayriska qaba uu lahaan doono astaamihiisa.

Waa maxay caabuqa Meningococcal (caabuqa maskaxda) Kooxda C?

Xanuunak MenC waxaa keena caabuqa kooxda C ee bakteeriyada meningococcal. MenC wuxuu keeni karaa qoorgooye, kaasoo ah caabuq iyo barar kudhaca xididada maskaxda, iyo sepsis (caabuqa kadhasha falcelinta jirku kafalceiyo infakshanka). Labadooduba xanuunada qoorgooyaha iyo sepsis waa xanuuno aad udaran kuwaasoo keeni kara dhimasho. Kadib markii lasoo saaray talaalka MenC waxaa jiray hoos udhac aad ubadan oo kuyimid xanuunada MenC ee dhamaan da'aha kaladuwan. Hase yeeshee dhawrkii sano ee lasoo dhaafay waxaa jiray kor ukac yar oo kuyimid tirada xanuunada Men C. Waxaan doonaynaa inaan aragno in arintaan ay keenayso in dad kooban oo kamid ah bulshada ay qabaan heerarka difaaca jirka oo aad usareeya kuwaasoo kahortaga bakteeriyadaan.

Waa maxay Diphtheria?

Diphtheria waa xanuun bakteeriyada kadhasha oo si fudud layskugu gudbiyo. Bakteeriyadu waxay sosaartaa sun taasoo keenta in qofku si degdeg ah ulasoo dhaco qandho, dhuun xanuun, qanjiro barar iyo mararka qaar haaro kasoo baxa maqaarka. Waxay mar ahaan jirtay sababta ugu wayn ee caruurtu udhintaan. Wadamada leh barnaamijyada talaalka ee tayada leh waxay yarayeen tirada dadka udhinta laakiin dad xanuunka qaba oo cusub ayaa ka imaan kara wadamada xanuunku kajiro. Sanadkii 2018 waxaa jiray kor ukac kuymid dadka qaba marka loo fiirsho sanadihii kahoreeyay, inkastoo dadka laxanuunsaday ay qabeen talaalka aysana booqan wadanka uu xanuunka diphtheria kubadan yahay

Maxaa lagu samaynayaa daraasadaan?

Waxaan qoran doonaa ilaa 3500 oo qof oo jooga meelo kala duwan oo Wadanka Ingiriiska ah. Waxaa jiri doona booqasho kaliya oo leh shaybaadhka dhiiga, iyada oo la isticmaalayo suuxdin ama buufinta halka, caruurta yaryarna, kaaliyaashu waxay mashquuliyanayaan cunugaaga si ay uga yareeyaan cabsida. Ka qayb galayaasha qaar ayaa lagu soo casuumi doonaa inay ku celiyaan muunada dhiiga iyo candhuufta booqashadooda xigta.

Booqashada kowaad waxaan kuwaydiin doonaa macluumaad ku saabsan ilmahaaga:

- Taariikhda Dhalashada
- Jinsiga
- Nambarka Boostada
- Macluumaadka GP ga
- Kooxda Isirka
- Xaalada nolosha
- Taariikhda talaalka
- Taariikh dhawaan ahayd oo caabuq neefsiga ah (sida, qufac iyo hargab) macluumaadka lagala xidhiidhaya ilmahaaga iyo qoyskaaga.

Hadaad go'aansato inaan kaqaybgasho waxaan diyaarin doonaa inaan kugu qaabilno adigga iyo cunugaaga xarunta caafimaadka ee kuudhaw ama gurigaaga, ayadoo kuxiran qaabka kuhaboon deegaankaaga. Haday caruur badan kunool yihiin gurigaaga kaliya hal mid ayaa kaqaybgali kara ilaa inay da' ahaan 5 sano kala wayn yihiiin maahee.

Markaad balanta utimaado, xubin kamid ah kooxda daraasada ayaa:

- Kaala hadli doona dasraada kaagana jawaabi doona su'aalo kasta oo adigga ama cunugaagu aad qabi kartaan
- Kuwaydiinaaya inaad saxiixdo foomka ogolaanshaha hadaad ogolaato inaad kaqaybgasho
- Waxaa lagu waydiin doonaa adiga iyo ilmahaaga hadii aad doonaysaan inaad mustaqbalka siiso muunada dhiiga iyo candhuufta daraasada.
- Wuxuu ku waydiinayaa xogta aasaasiga ah ee kor ku qoran
- Su'aalo kaawaydiinaaya taariikhda caafimaad ee cunugaaga iyo xarirada qoyska
- Muunada dhiiga ka timid ilmahaaga (qadarka heerarka laga bilaabo 2 mls ee ka yar da'da 2 sano ilaa 30 mls wixii ka wayn 15 sano jirka, tani waxay u dhaxaysaa ½ qaado iyo 6 qaaddo.)

Mudada guud ee balantu waa inay qaadataa kudhawaad 45 daqiiqo.

Ka qayb galayaasha lagu arkay rugaha caafimaadka waxaa la siin doonaa foojarka £20 oo magdhaw u ah safarka rugta caafimaadka.

Maxaad u dalbanaysaa in lagu celiyo muunada dhiiga iyo candhuufta qaar kamid ah ka qayb galayaasha?

Marka aanu soo saarno antiboodhiga lagula dagaalamao caabuqa waxa laga arkaa dhiiga iyo candhuufta. Caabuqyada qaar kadib antiboodhiyadani waxa ay noqdaan heer sare oo mudo dheer ah kuwaas oo nasiiya ilaalin. Wixii caabuqyada kale ah waxa ay hoos ugu dhacaan si dhakhso ah taas oo ka dhigay inay caabuq lamid ah qaadayaan mar kale. Waxyar ayaa laga yaqaanaa sida uu jidhku uga jawaabo COVID-19 gaar ahaan dadka leh calaamada yar, oo marka la qaado muunad dhiig oo soo danbe iyo candhuug waxa aanu rajaynaynaa in aanu aragno sida heerka antiboodhigu isku badalayo mudo kadib. Markaa, waxa aanu doonaynaa in aanu qaadno 1 ilaa 3 muunadadood oo dhiig oo dheeraad ah 2 ilaa 3 bilood ee soo socda oo dadka ka qayb galaya qaar ah, oo ay la socoto shaybaadhka candhuufta ee qaabka kale looga baadhayo antiboodhiga. Booqasho kasta waxa kaa waraysan doonaa calaamadaha COVID-19 ama wixii kale qoyska ah ee qaaday ilaa intii aad booqashadii ugu danbaysay ku timid. Waxa aanu ka dalban doonaa inay muunada noogu celiyaan ka qayb galayaal isku jira oo shaybaadhkooda laga helo ama la waayay COVID-19 antiboodhiga ah markii kowaad. Hadii aanu kaa dalbano inaad usoo noqoto muunada dhiiga/candhuufta laguuma sheegi doono in shaybaadhkaagaas lagaaga heley ama lagaaga waayay COVID-19.

Fadlan ogsoonaw inaad diidi karto ku celinta muunada laakiin waxa aad weli kusii jiraysaa

Qasab miyaa in cunugaygu kaqaybgalo daraasadaan?

Maya, tani qayb kama ahan daryeelka joogtada ah, inaad kaqaybgasho daraasadu waa mid ikhtiyaari ah. Hadaad go'aansato inaadan kaqaybgalin daraasadaan wax saamayn ah kuma yeelanayso daryeelka caadiga ah ee cunugaaga sinaba. Waxaad xor utahay inaad fikirkaaga badasho markaad doonto. Waxkasta ood doorato, waa muhiim inaad ahaato qof kufaraxsan go'aankaaga mana ahan shaqo utaala kooxda daraasada inay kaacaawiyaan gaarista go'aankaaga.

Waa maxay khasaarooyinka iyo halisaha kadhalan kara kaqaybgalka?

Kadib marka laga baaro dhiiga cunugaagu wuxuu dareemi karaa xanuun muddo kooban ah iyo nabar kasamaysma meesha dhiiga laga qaaday.

Waa maxay faaiidooyinka kaqaybgalku?

Ma jiraan wax faa'iidooyin gaar ah in laga qayb qaato daraasadan, iyo ka qayb galayaashu lama siin doono natiijooyinkooda gaarka ah. Macluumaadka lagusoo aruursho daraasadaan waxay naga caawin doonaan inaan baranoxogta caabuqyada sida novel coronavirus (COVID-19) iyo qaabka ugu fiican ee dadka daraasada lagu sameeyay looga difiici karo xanuunada looga hortagi karo talaalka sida Men C iyo diphtheria.

Waxaa lagu samaynayaa tijaabooyinka dhiiga ee lagu aruursho daraasada?

Muunada uu bixiyay ilmahaaga waxaana lagu xaraynayaa shaybaarka goobtaada maxaliga ah kadibna waxaa loo gudbinayaa shaybaarada Public Health England (PHE) halkaasoo baaritaanka taxliilinta ah uu kadhici doono. Wixii tijaabooyin ah oo soo hara waxaa kaydinaysa PHE iyo Oxford Vaccine Group, University of Oxford, waxaana loo adegsan karaa daraasadaha mustaqbalka oo la xariira cudurada caabuqyada. Masuurgali doonto in laga aqoonsado cunugaaga tijaabada laakiin waa lasoo qaban karaa dhiigaaga hadaad rabto inaad kabaxdo daraasada. Waxaan sidoo kale fasax kuu waydiisan karnaa inaan kaqaadno tijaabada DNA ga dhiiga cunugaaga, laakiin waad diidi kartaa ogolaanshahaan walina waxaad kasii qayb qaadan kartaa daraasada. Tijaabooyinka DNA ga ee lagusoo aruursho daraasadaan waxaa lagu kaydinayaa Oxford Vaccine Group, University of Oxford.

Sababtee ayaad u dooni kartaa inaad daraasad ugu samayso DNA ga ilmahayga?

Summada DNA ga gaarka u ah cunugaaga waxay samayn kartaa sida jawaabta nidaamyada difaacu ka baxshaan tallaalka iyo caabuqyada. Waxaanu jeclaan lahayd inaan daraasad ku samayno kala duwanaanshaha DNA ga dadka sida ay u saameeyo jawaabta difaaca ee tallaalada ama caabuqyada si loo horumariyo fahankayaga sida ugu fiican ee l;ooga hortagi karo caabuqyadaan.

Kaqaybgalkayga daraasadaan mayahay mid qarsoodi ah?

Haa. Dhamaan macluumaadka iyo tijaabooyinka dhiiga ee laga qaado cunugaaga waxaa lagu aqoonsanayaa nambar daraasdu usamaysay waxaana lagu haynayaa si sirnimo adag ah.

Macluumaadka cunugaaga waxaa lagu karaynayaa seerfar amaan ah, koobiyada waraaqda kuqorana waxaa haynaysa Goobtaada maxaliga ah ayadoo galinaysa khaanad qufulan. Kaliya

shaqaalaha daraasada oo fasax uhaysta ayaa arki kara macluumaadka iyo tijaabooyinka cunugaaga.

Markaad ogolaato, waxaan kafiirin karnaa taariikhda talaalka iyo caafimaadka ee cunugaaga diiwanada caafimaadka, kaydka macluumaadka NHS ama dhakhtarka GP ga cunuga.

Maxaa dhacaaya hadaanan rabin in cunugaygu sii wado daraasada?

Waxaad badali kartaa fikirkaaga waxaadna kabixi kartaa daraasada xiligaad doonto adoon wax sabab ah sheegin. Haddii aad badasho fikirkaaga kadib marka cunugaaga laga qaado tijaabada dhiiga waxaad nagusoo wargalin kartaa qoraal kadibna dhiiga laga qaaday ayaa laga sari doonaa liiska lana burburin doonaa. Wax baaritaan dheeri ah laguma sii samayn doono tijaabada dhiiga.

Maxaa dhacaaya dhamaadka daraasada cilmi baarista ah?

Natiijooyinka daraasada waxaa lagusoo daabacayaa joornaal gaar ah oo cilmiga caafimaadka kahadla; tani waxay qaadan kartaa dhawr sano. Dhamaan daabacaadaha lagu sameeyo daraasada waxay kasoo muuqan doonaan webseetka Oxford Vaccine Group (OVG) oo ah www.ovg.ox.ac.uk waxaadna heli doontaa waraaq sheegaysa natiijooyinka ugu waawayn ee kasoo baxay daraasada. Majiro wax warbixin ama daabacaad lagu sheegi doono aqoonsiga cunugaaga mana bixinayno natiijooyinka dad gaar ah. Hadaad doonayso in lagugusoo wargaliyo daraasadaha kale ee cilmi baarista ah kuwaasoo laga yaabo inaan mustaqbalka samaynayo waxaad iskaqori kartaa liiskeena dadka lala xariiraayo. Wax masuuliyad ah kaama saarna inaad kaqaybgasho wax daraasad mustaqbalka lasamaynaayo.

Maxaan samaynayaa hadaan doonaayo inaan kaqaybgalo daraasada?

Uma baahnid inaad wax go'aan ah isla markaanba qaadato. Hadaad go'aansato inaad kaqaybgaliso cunugaaga daraasadaan, talaabada xigta waxay noqonaysaa inaad ugudubto www.whatsthestory.org.uk si aad ubuuxiso hanaanka oonleenka ee uqalmida iyo buukin garaysiga. Taas badalkeed, waxaad laxariiri kartaa kooxda daraasada, kuwaasoo kufaraxsanaan doona inay kaala hadlaan daraasada, kajawaabo su'aalo kasta ood qabi karto wayna kubaari karaan kadibna kuubuug garayn karaan booqashadaada daraasada oo laguugu balamiyo taleefanka ama iimeelka.

Hanaanka qorista waxaa lagu samaynayaa si talaaboyin ah, tan waxaa usabab ah waxaan doonaynaa inaan helno muunado kaqaybgalayaasha gobalkaaga kusugan ee matalaya qaababka bulshada gebi ahaann. Waxa aanu sidoo kale doonaynaa in aanu si degan dhawrka bilood ee soo socda aanu ku sugno khariirada wax qabadka SARS-COV-2 ee bulshada. Sidaas awgeed waxaan hubin doonaa macluumaadkeena intaan socono si aan ufiirino inaan buuxinayno yoolkeena. Tani waxay keeni kartaa dib udhac, si aan kuulasoo xariirno. Waxaa lagugusoo wargalin karaa hadhoow heerka shaqaalaysiinta ama waxaa laga yaabaa inaan kulasoo xariirno si aan kuugu sheegno in dadka aan kaqorayno aagaaga ladhamaystiray. Kaarka boostada oo xasuusin ah ayay kusoo diri kartaan Adeegyada Xogta Caafimaadka ilmaha/Codsiyada Caafimaadka Qaran iyo Adeegyada Kaabayaasha (NHAIS)/ama kaydka xogta NHS oo kan kore u dhigma. Hadaanaan wax jawaab ah kaahelin codsigaan kadib, waxaan uqaadanaynaa inaaan doonayn inaad kaqaybgasho.

Waad kumahadsan tahay inaad kafakarto kaqaybgalka daraasadaan.

Bayaanka GDPR (Sharciga Guud ee Diffaca Macluumaadka)

University of Oxford ayaa maalgalinaysa daraasadaan oo lagu samaynaayo Boqortooyada Ingiriiska. Waxaan u adeegsan doonaa macluumaadka aan kaaqaadno si aan usamayno daraasadaan waxaana noqonaynaa xakamaeeya macluumaadka daraasadaan. Tani waxay kadhigan tahay inaan masuul kanahay ilaalinta macluumaadkaaga iyo inaan si wanaagsan u adeegsano.

Waxaan adeegsan doonaa magacaaga iyo macluumaadka xariirka si aan kaagalasoo xariirno arimaha quseeya daraasada, aana u xaqiijino in macluumaadka saxda ah ee laxariira daraasada lookaydiyo daryeelkaaga, aana kormeer ugu samayno tayada daraasada. Dadka kaliya ee kujira Waa maaxay kooxda STORY? kuwaasoo heli doona macluumaadka aqoonsigaaga wata ayaa ah dadka doonaaya inay kulasoo xariiraan si ay usameeyaan daraasada ama xisaab xir ugu sameeyaan hanaanka macluumaad aruurinta. Dadku kuwaas oo faaqida macluumaadka (Caafimaadka Dad waynaha Ingiriiska iyo Kooxda Tallaalka Oxfor) waxay heli doonaan macluumaadka kor ku qoran (gudaha qaybta 'Maxaa ka dhacaha daraasadan gudaheed') laakiin ma heli doonaa magacaaga ama faahfaahintaada xidhiidhka.

Goobtaada maxaliga ah ayaa haynaysa macluumaadka lagugu aqoonsan karo ee ku saabsan ilmahaaga lagana helo daraasadaan ugu yaraan muddo dhan 3 sano ka dib marka qofka ugu yar ee kaqaybgala daraasadu gaaro da'da 18 sano jir. Waxaanu u kaydin doonaa xogta cilmi baadhida magaca la qarinayo wakhti aan xadidnayn.

Xaquqdaada ku aadan helitaanka, badalida ama wareejinta macluumaadkaagu waa mid xadidan, maadaama aan ubaahanahay inaan macluumaadkaaga umaarayno qaabab gaar ah si daraasadu unoqoto mid la isku halayn karo oo saxan. Hadaad kabaxdo daraasada, waxaan kuhaynaynaa macluumaadka kula xariira ee aan horay usoo aruurinay. Si aan udhawrno xuquuqdaada, waxaan adeegsan doonaa macluumaadka shaqsiyan lagugu aqoonsan karo ee ugu yar sida macquulka ah.

Marka daraasada ladhamaystiro, dhamaan dukumiintiyada waxaa lagu xaraynayaa xarun amaan ah oo ay maamusho goobtaada maxaliga ah Faylalka waxaa loo burburinayaa si qarsoodi ah hadaan kaydin intaas kabadan loosii baahnayn.

Baadhaha Muhuumka ah ee maxaligaaga, ama cida shaqadooda qabanaysa, ayaa masuul kanoqonaysa ilaalinta macluumaadka. Macluumaad dheri ah oo kusaabsan xaquuqdaada oo laxariira macluumaadkaaga shaqsiga ah waxaad kahelaysaa:

http://www.admin.ox.ac.uk/councilsec/compliance/gdpr/individualrights/

Kawaran hadaan rabo inaan cabasho gudbiyo?

Hadaad doonayso inaad cabasho kagudbiso wax kamid ah qaabka laguu waajahay ama laguula dhaqmay intii lagu jiray daraasadaan, waaa inaad laxariirtaa:

Oxford Vaccine Group adoo kawacaaya 01865 611400 ama iimeel ugudir info@ovg.ox.ac.uk. Waxaad sidoo kale laxariiri kartaa Xafiiska University of Oxford Clinical Trials and Research

Governance (CTRG, Maamulka Baaritaanada Caafimaadka iyo Daraasada) adoo kawacaaya 01865 616480 aa iimeel udir CTRG adoo ugu diraaya ctrg@admin.ox.ac.uk . Hadaadan doonayn inaad hesho casuumadaha noocaan ah mustaqbalka, fadlan kaqor cunugaaga liiska diidmada ee Oxford Vaccine Group (Kooxda Talaalka ee Oxfordd) ood kahelayso http://trials.ovg.ox.ac.uk/trials/opt-out.

AMA

Haddii aadan doonayn in NHS ay adeegsato diiwaanadacaafimaadka cunugaaga si ay ugu taageerto daraasado kasta oo caafimaadka la xariira, fadlan booqo https://www.nhs.uk/your-nhs-data-matters/manage-your-choice si aad u samayso dookhaaga.

University of Oxford, oo ah maalgaliyaha, hwaxay leedahay caymis kuhaboon hadii ay timaado dhacdo nasiib daro ah oo ah in cunugaagu ladhibaatoo waxyeelo si toos ah uga dhalatay kaqaybgalka daraasadaan. Si taas lamid ah, xaruaha meelaha lagu samaynaayo daraasada waxaa kajiri doona caymis kuhaboon; wixii macluumaad dheeri ah waa lagu siinayaa markaad ubaahato.

Maxaa kale oon ubaahanay inaan ogaado?

Dhamaan daraasada NHS waxaa ilaaliya koox madax banaan oo dad ah, kuwaasoo loogu yeero Research Ethics Committee (Gudiga Hufnaanta Daraasada), si loodifaaco masaalixda kaqaybgalaha. Daraasada waxaa muraajacaysay oo fikir wanaagsan kabixisay daraasada Guddida Cilmi baadhida Isirka ee London.

Daacad kuu ah,

Waa maxay STORY? kooxda daraasada